Foto: Boris Heger/IKRK

Foto: Ash Sweeting/Britisches RK

## Sheekada Samira

*Nolosha Samira* waxaa si weligeed ah u beddeshay colaaddii waddanka Ciraaq ee ay ku dhalatay. Ninkeeda ayaa laba jeer oo hore loo afduubay sababo siyaasadeed. Ka dib markii saddexaad ee la afduubay waxay Samira maqashay in ninkeedii la dilay. Dhacdadaas masiibo ah ayaa keentay in iyada iyo carruurteedu u cararaan Suuriya. Waxay awoodday in ay halkaas ka gasho dalka Jarmalka taasoo qayb ka ahayd qorshe qaxooti oo samafal ah.*

*Samira weligeed ma rajo tuurin in uu ninkeedu weli nool yahay. Waxay marka hore codsi raadin ah u dirtay Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka si ay halkaas uga hesho war cusub oo ninkeedii ku saabsan. Dhab ahaan, xoogaa bilo ah ka dib waxay heshay warkii ay sugaysay, in ninkeedii uu ka badbaaday afduubkii oo uu Baqdaad ku nool yahay.*

*Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka ayaa Samira ka taageeray damacii ay ku rabtay in ay qoyskeeda isugu keento Jarmalka. Hase yeeshee, waxay u muuqatay in damacaasi ay ku guul darraysanayso sababtoo ah dhibaatooyin sharci ah oo u muuqday in aanay ka gudbi karin. Ka dib markii uu helay talobixin sharciyeed oo qoto dheer, Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka ayaa ku taliyey in Samira ay Jarmalka ka dalbato magangalyo. Codsashada magangalyada ayay ku guulaysatay. Waxay taasi wanaajisay xaaladda sharciyeed ee Samira waxayna ninkeedii u suurtogalisay in uu xaaskiisa ugu yimaaddo Jarmalka isagoo aanan u baahnayn in uu caddeeyo in uu luqadda Jarmalka yaqaanno ama in uu haysto meel sugan oo uu ka heli karo dakhli uu ku noolaado. Laba toddobaad ka dib waxaa Samira aakhirkii suurogal u noqotay in ay ninkeeda kula kulanto madaarka.*

** Magaca waxaa beddelay kooxda tafatirka*

## La xiriir

**Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka ee kuu dhow**

**Gobollo kaladuwan**


**Raadinta Caalami ah, Farriimaha Laanqayrta Cas iyo Caddaynnada ku saabsan Waqtiga Xabsiga**
DRK-Suchdienst
Standort München
Chiemgaustraße 109
81549 München
Telefon: 089 / 68 07 73 -111
E-Mail: tracing@drk-suchdienst.de

**Isu keenidda Qoyska:**
DRK-Suchdienst
Standort Hamburg
Amandastraße 72-74
20357 Hamburg
Telefon: 040 / 4 32 02 -221
040 / 4 32 02 -176
E-Mail: fz@drk-suchdienst.de
**Warbixin dheeraad ah iyo warsidaha:**
**www.drk-suchdienst.de**



Somali | © DRK e.V. | 2015



ANSICHTSEXEMPLAR


RESTORING FAMILY LINKS

Deutsches Rotes Kreuz
SUCHDIENST

# Raadinta Caalami ah ee Xubnaha Qoyska

# Taageerada Isu keenidda Qoyska

Foto: Pedram Yazdi/IKRK

## Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka

Laanqayrta Cas ee Jarmalku waxay qayb ka tahay Dhaqdhaqaaqa Caalami ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas

Foto: IKRK

Foto: Michael von Bergen/IKRK

Foto: Somalischer Rote-Halbmond

## Waxa aan qabanno

### Waxaan raadinnaa xubnaha qoyska

*Miyuu xiriirku idinka lumay adiga iyo qaraabadaada oo ma ogid halka uu qofkaasi ku nool yahay?*
Waxaan dunidoo dhan ka raadinnaa dadka aad kala lunteen ama la waayey sababtoo ah

- dagaal iyo colaado dagaal
- masiibooyin,
- saaris iyo baxsasho
- haajiraad ama socdaal

waxaanan soo ogaannaa waxa dadkaas ku dhacay.

*Miyaad rabtaa in aad internetka ka raadiso qaraabadaada?*
Goobta www.familylinks.icrc.org/europe waxaad ka heli kartaa sawirrada dadka kale ee iyaguna qaraabadooda raadinaya. Waxaad weliba halkaas ku dhaafi kartaa sawirkaaga.

### Wada xiriirinta qoysaska

*Miyaanay suurogal kuu ahayn in aad la xiriirto qaraabadaada?*
Dunidoo waxaan ku gudbinnaa waxyaabo loo yaqaanno „Farriimaha Laanqayrta Cas“ oo ay isu diraan qoysaska ku nool gobollada ay saameeyaan colaadaha iyo masiibooyinku iyo qaraabadooda deggan Jarmalka. Farriimahaasi badi waa fursadda keliya ee ay qaraabada kala luntay u helaan in ay wada xiriiraan.

## Waxa aan qabanno

### Waxaan isu keennaa qoysaska

*Miyuu qoyskaagu ku kala firdhay waddamo kaladuwan sababtoo ah dagaal, saaris ama baxsasho?*
*Miyaad rabtaa in aad mar kale la noolaato qoyskaaga?*
Waxaan ku deeqnaa talobixin iyo taageero ku saabsan wixii su‘aalo ah ee la xiriira isu keenidda qoyska.

- Talobixin ku saabsan shuruudaha sharciyeed ee ku habboon isu keenidda qoyska ee Jarmalka
- Taageero laga helo codsiyada dalkugalka ama fiisaha
- La xiriiridda ururrada kale ee caawimaadda ee gobolka ama caalamka

### Adeegga dheeraad ah: caddaynnada ku saabsan waqtiga xabsiga

*Miyay masuuliyiinta Jarmalku kaaga baahan yihiin in aad dhiibto caddaynta ku saabsan xabsiga aad dalka dibaddiisa kaga soo jirtay?*
Waxaan ku deeqnaa gargaar dunidoo dhan laga heli karo marka loo baahan yahay caddaynnada waqtiyada xabsiga. Haddii Guddiga Caalami ah ee Laanqayrta Cas (International Committee of the Red Cross) (ICRC) ay ku soo booqdeen waqti aad xabsi ugu jirtay dalka dibaddiisa, waxaan isku dayi doonnaa in aan kuu helno caddayn.

## Sida aan u shaqayno

### Wixii annaga nagu saabsan

- Waxaan qayb ka nahay shabakadda adeegga caalami ah ee raadinta oo ka kooban Guddiga Caalami ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) iyo Mujtamacyo qaran oo ah Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas oo tiradoodu tahay 189.
- Sida waafaqsan mabaadii‘da Dhaqdhaqaaqa Caalami ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, waxaan nahay dad aan meelnaba raacsanayn oo meeldhexaad ah, aan eexasho lahayn dadkana ulama dhaqanno si gooni ah oo ku salaysan asalkooda jinsiyadeed ama diinta ay raacsan yihiin.
- Tobaneeyo sano oo farabadan ayaan isu keenaynay qoysas kala jooga waddamo kaladuwan.
- Sababtoo ah khibraddayada sanadaha farabadan waxaan aqoon qoto dheer ka helnay shuruudaha sharciyeed ee waddamada u yaalla waxaanan xiriirro la isku tiirin karo la dhisannay ururro kale.
- Macluumaadkaaga iyo macluumaadka qofka aan raadinayno waxaa lagu hayaa sir adag.
- Waxaan nahay urur caawimaad oo madaxbannaan oo marka aad si cad nooga codsato oo keliya ayaan la shaqaynaa masuuliyiinta Jarmalka iyo dalalka kale.
- Lacag kama qaadno dadka aan u adeegno.

ANSICHTSEXEMPLAR